



Guddoonka Waxbarashada ee Kaalgari (CBE) way fahamsan tahay inay jiraan dakhli yari iyo xaalado kaloo khaas ah oo ka hor istaagi kara waalidiinta inay bixiyaan iskuulka kharashyadiisa.

Sidaa awgeed, Guddoonka Waxbarashadu (CBE) waxay u huraysaa waalidiinta dakhligoodu yar yahay fursad ay ku dalbadaan in laga dhaafdo ikuulka kharashkiisa oo ay carruurtoodu sii wadan karaan waxbarashadooda ugana qeyb qaataan iskuulka arrimaha ka dhacaya.

Tani waxaa loogu yeeraa Kharash Dhaaf. Hadduu waalidku xaq u yeesho kharash dhaafka, ma bixin doonaan Bus raaca, Ilaalinta xilliga barqadii ama Qalabka loo isticmaalo wax baridda. Weli waxaa dhici karta kharashka kaloo laga rabo xaaladaha qaarkood.. Waalidka looma soo diri doono biil la xiriira arrimahaas aan soo sheegnay, loomana diri doono qaan-sheegasho.

Si aad u dalbato kharash-dhaaf, waalidku waa inuu buuxiyaa foomka loogu yeero “Kharash Dhaaf Dalab 2015-2016”. Foom-kan ku soo dir cinwaanka P.O. Box 5410, Station A, Calgary, T2H 1X8 ama ku reebtid caruurtaada iskuulkooda si loogu soo gudbiyo Saldhigga Waxbarasha iyadoo ku lifaaqan caddeyn tusaysa dakhli-yarida qoyska. Nooca caddeynta lagaa doonayo waxaad ka arki kartaa dokumentiga “Kharash Dhaaf – Sida loo dalbado 2016-17”.

Si loo sugo inay ardaydu heelaan adeegyada, waalidku waa inuu buuxiyaa foomamka diiwaan-gelinta ee adeeg-yada carruurtoodu u baahan yihiin, sida:

“Ballan-qaadka Iskuul-Bas Raaca: Diiwaan-gelinta iyo kharashka Buska 2016-17”

“Ballan-qaadka Iskuul-Bas Raaca ee Ardayda Baahidooda Barasho ay Xooggan tahay 2016-2017”

“Ka-Dhaafidda Gadashada Kaalgari Bas-Tikidhka ee bisha 2016-17”

“K-6 Ilaalinta Barqadii/Qadada: Diiwaangelin iyo kharashyada 2016-17”

Waxaad ogaataa maalinta kama-dambeysta ah ee la buuxinayo foomka Baska waa bilowga bisha Juun, saas awgeed foomamka ha loo buuxiyo si dhaqso ah.

Haddii waalidku buuxin waayo shuruudaha kharash-yarida ee lagu dhaafayo bixinta biilka iskuulka, waa weli suuragal ah in laga dhaafdo kharash-yada Baska, Ilaalinta Barqada ee qadada, iyo qalabka barshada. Waalidku waa inuu la xiriiraa Maamulaha Iskuulka isagoo u sheegaya sababta ay ugu adkaatay inuu bixiyo kharashyadan. Maamuluhu wuxuu kaala hadli doonaa heshiiska, shuruudaha bixinta kharashka qaar buu kaa dhaafi doonaa ama kulligeed markaad buuxiso foomka lagu magacaabo “Oggolaanta Maamulaha ee arjiga Kharash-Dhaafka”. Maamuluhu wuxuu awood u leeyahay inuu ka dhaafdo kharashka/biilka iskuulka, markuu waalidku biixiyo foom lagu magacaabo “Ka-Dhaafidda Kharashka ee Maamuluhu Oggolaaday”.

Marka Maamuluhu diyaario foom-kan, waalidku wuxuu helayaa Kharash-Dhaaf u dhigma sida dakhli yarida. Carruurtuna waxay sii wadan doonaan waxbarashadooda, kana qeyb qaadan doonaa iskuulka howlihiisa kala duwan. Waalidkuna ma helayaan wa qaan-sheegasho ah. Waalidka qaarkood wey dhici kartaa in kharashyada qaarkood laga codsado iney wax ka bixiyaan hadduu qorsheeyo Maamuluhu sidaa.

Haddaad u baahato adeegyada tarjumaanka, fadlan la soo xiriir iskuulka carruurtaadu dhigato si ay kuugu codsadaan tarjume.

Mahadsanid.